*Dowlad-Goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya*

*Hirshabelle State of Somalia*

# Warbixinta Qaab Dhismeedka Misaaniyadda  Sanad-Maaliyadeedka 2025

## Dowladda Goboleedka Hirshabelle

# TUSMADA


Hordhac ........................................................................................................................ 4

1 Dhaqaalaha iyo siyaasadaha guud ..................................................... **Error! Bookmark not defined.**

1.1 Qaab-dhismeedka Siyaasadda iyo Dhaqaalaha ........................................................................ 5

1.2 Dhaqaalaha Qaranka ............................................................................................................ 5

1.3 Dhaqaalaha gudaha .............................................................................................................. 6

1.4 Qiimaha maciishada gudaha .................................................................................................. 8

1.5 Siyaasadda guud......................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

2 Qaab dhismeedka Maaliyadda ................................................................................................ 10

1.1 Dakhliga Guddaha.......................................................................................................13

3.1.2 Ballanqaadyada dakhliyadda Dibadda ( Deekha dibadda) ..................................................17

3.1.3Khataraha Maalgalineed.................................................................................................17

3.1.4Istaraatiijiyada Horumarinta Dakhliga ................................................................................17

3. Xadiga qarashaadka ee Qaabdhismeedka Miisaaniyadda .................... **Error! Bookmark not defined.**

3.2 Hindisayaasha Muhiimka ah ................................................................................................ 15

3.3 Sida loo go'aamiyo lacagaha ugu badan ee aan laga sare mari karin ...................................... 17

4 Khataraha ku wajahan Miisaaniyadda ...................................................................................... 24

4.1 Arrimaha ubaahan in isha lagu haayo si horey loogu socdo ......... **Error! Bookmark not defined.**


# JADWALADA


Tusaha 1 – Arrimaha Jiritaankooda Lagu Xisaabtamey ee la xiriira Dhaqaalaha Guud ee Dalka ............... 5

Tusaha2 – Waxqabadka dakhliga ee taariikhiga ah..................................... **Error! Bookmark not defined.**

Tusaha3 – Dakhliga La Saadaaliyay iyo Kan Dhabta ah (Hore) ................................................................ 12

*Tusaha 4 – Dakhliga La Saadaaliyay iyo Kan Dhabta ah (Dib-loo-saxey)* ...... **Error! Bookmark not defined.**

Tusaha 5 – Waxyaabaha ay ka kooban yihiin Ballanqaadyada Go'an (Wadarta) .................................... 18

Tusaha 6 – Waxqabadka FY 2023 marka loo eego Qaybaha .................................................................. 19

Tusaha 7 –Miisaaniyadda FY 2024 marka loo eego Qaybaha.................................................................. 20

Tusaha 8 – Saamiyada Xaddiga Lacagaha Ugu Badan iyo Mudnaanaha Siyaasadda ................................ 21

Tusaha 9 – Miisaaniyadda 2025 ee ugu dambeysa .................................................................................. 22

Tusaha 10 – Saadaasha Kharashaadka 2025 ............................................... **Error! Bookmark not defined.**

Tusaha 11 - **Tusaha Halista Maaliyadda Guud (Macro-Fiscal Risk)**......................................................... 25

# EREYO LA SOO GAABIYEY

| | |
|---|---|
| AMISOM | African Union Mission in Somalia / Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya |
| BFP | Budget Framework Paper / Warqadda Qaabka Guud ee Miisaaniyadda |
| EPHS | Essential Package of Health Services / Xirmada Aasaasiga ah ee Adeegyada Caafimaadka |
| FGS | Federal Government of Somalia / Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) |
| FMIS | Financial Management Information System / Hannaanka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda |
| GDP | Gross Domestic Product / Wax-soo-saarka Guud ee Gudaha |
| ICT | Information, Communication and Technology / Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda |
| IMF | International Monetary Fund / Sanduuqa Caalamiga ah ee Lacagta |
| HSS | Hirshabelle State of Somalia / Dowlad-Goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya |
| MDA | Ministries, Departments and Agencies / Wasaaradaha, Waaxaha & Wakaaladaha |
| MoF | Ministry of Finance / Wasaaradda Maaliyadda |
| MoPIC | Ministry of Planning and International Cooperation/Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga |
| NDP | National Development Plan/Qorshaha Horumarinta Qaranka |
| PFM | Public Financial Management/Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dowladda |
| RHMT | Regional Health Management Teams/Kooxaha Maareynta Caafimaadka Gobolka |
| RMS | Revenue Management System/Hannaanka Maareynta Dakhliga |

# HORDHAC

Miisaaniyad Sanadeedka Dowlad-Goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya (HSS) waa habka ugu muhiimasan oo ay Dowladdu ku hirgeliso siyaasadaheeda.  Warqadda Qaab-dhismeedka Miisaaniyadda (BFP) waxay bixisaa xiriirka u dhaxeeya siyaasadaha guud ee Dowladda iyo Miisaaniyad Sannadeedka. Waxay dhigeysaa qaababka guud ee maaliyadda iyo istiraatiijiyadda loogu talagalay miisaaniyadda, waxayna sidoo kale bixinaysaa saadaasha muujinaysa dakhliga iyo kharashaadka muddada-dhexe oo ku saleysan falanqeynta xaddiga miisaaniyaddii hore ee la xaqiijiyay. Qaabka dhaqaalaha guud ee BFP ayaa ka dib bixinaya qoondeymaha muujinaya kharashaadka ee hagaya Wasaaradda Maaliyadda (MoF) iyo Wasaaradaha, Waaxdaha iyo Hay'adaha (MDAs) kale marka la diyaarinayo miisaaniyadaha kharashaadka ee Baarlamaanka la horgeeyo. Warqadda BFP waxay soo koobaysaa waxqabadyada Dowladda ee Sanad Maaliyadeedka 2025 iyo kuwa muddada-dhexe waxayna la halmaashaa Mudnaanaha Istiraatiijiga ah ee Dowlad-goboleedda, Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) ee Federaalka ee 2020-2024 iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Warqadda BFP waxay leedahay qaybahan soo socda:

### Qaybta 1aad:  Qeybta 1aad muuqaalka guud ee Dhaqaalaha iyo Ahdaafta Siyaasadeed

Qaybtan waxay bixinaysaa guudmarka siyaasadaha dhaqaalaha guud ee dowladda, lafogurista waxqabadka dhaqaalaha guud ee dhowaan, iyo arrimaha muddada-dhexe ee jiritaankooda lagu xisaabtamey ee dhaqaalaha guud. Wuxuu dhigayaa mudnaanaha lagu qoray Qorsheyaasha Horumarinta Qaranka (NDP) ee la qorsheeyay in uu dhammaado 2024, iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka ee cusub.

### Qaybta 2aad:  Qaab dhismeedka Maaliyadda

Qaybtan waxaa ka mid ah qorshayaasha siyaasadda isha dakhliga gaarka ah iyo dakhliga aan canshuurta ahayn iyo ilaha dibadda ee laga helayo Dowladda Federaalka iyo Bahwadaagta horumarinta caalamiga ah ee Dowlad-goboleedka ee waafaqsan saadaasha dhaqaalaha guud. Waxay ku soo gebogabeynaysaa iyadoo tusmaynaysa kheyraadyada ay Dowladdu heli karto si ay u hirgeliso ujeeddooyinkeeda istiraatiijiga ah iyo mudnaanaha siyaasadda.

### Qaybta 3aad:  filashooyinka iyo qoondeynta qarashka

Qaybtan waxay bixinaysaa qoondeymaha muujinaya kharashaadka oo hawl ahaan iyo hay’adaha Dowladda ahaan ah oo ku saleysan mudnaanaha istiraatiijiga ah ee Dowladda kuwaas oo ay ka mid yihiin amniga iyo horumarinta hufnaanta bixinta adeegga dowladda. Qaybtan waxaa ay si gaar ah xoog u saareysaa tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in la sii wado kharash-gareynta hufan ee dowladda. Warqadda BFP ka mid ma ahan faahfaahinta gaarka ah ee kharashaadka iyo qorshayaasha siyaasadda Wasaaradda/Waaxda/Hay'adda ee la soo-jeediyay. Si kastaba ha ahaatee, marka Dowladdu horumarto, waxaa si gaar ah xoog loo saarayaa diyaarinta qorshayaasha iyo kharashaadka waaxda/qaybta oo faahfaahisan ee loogu talagalay hay’ad walba.

### Qaybta 4aad:  Khatarta ku wajahan Miisaaniyadda

Halisahan ayaa gaar ku ah Hirshabeelle waxayna go’aaminayaan arrimaha saameyn ku yeelan kara dhaqaalaha guud iyo xaaladaha maaliyadeedba.  Arrimaha ugu muhiimsan waxaa ugu mudan xaddidnaanta xogta xaaladaha maaliyadda guud (macro-fiscal conditions) ee hadda jira.

# 1.1 DHAQAALAHA IYO SIYAASADAHA GUUD

## 1.1 KHAAB DHISMEEDKA SIYAADDA DHAQAALAHA

Hadafka guud dhaqaalaha ee Dowlad-goboleedka waa in la abuuro jawi dhaqaale oo xasilan si loo taageero koboc dhaqaale oo waara iyo in lahor mariyo dhaqan-dhaqaalaha bulshada. Sanadaha ina soo aadan, ujeedooyinka ugu weyn ee dhaqaalaha ee Dawladdu waa in la gaaro lana ilaaliyo heerka kobaca dhaqaalaha dhabta ah inta u dhaxaysa boqolkiiba 3 - 5% sanadkii.

Qorshaha horumarinta qaranka ee 9-aad waxaa loo dejiyay si uu u waafaqo shuruudaha (Istiraatiijiyadda Habka Dhimista Saboolnimadda), taasoo u ogalaatay Soomaaliya, ineey ka qeyb gasho “Hindisaha Waddamada saboolka ah ee deymaha badan lagu leeyahay (HIPC)”, Codsatana in laga cafiyo Deymaha. Hindisaha deyncafinta waxaa lagu guuleystay oo lasoo gabo gabeeyay Diisambar 2023. Dawladdu waxay hiigsanaysaa inay siiso adeegyadda horumarineed ee muhiimka u ah muwaadidniinteeda. Sidaa darteed qorshahani wuxuu diiradda saarayaa kordhinta dakhliga, horumarinta kobaca dhaqaalaha, iyo in lasameeyo hababkii lagu wadaagi lahaa dakhliyadda. In la yareeyo saboolnimadda iyo in lahagaajiyo dowladnimadda ayaa saldhig u ah dhamaan ahdaafta dowlladda.


## 1.2 DHAQAALAHA QARANKA

Shaxda 1aad waxay tilmaameysaa Faahfaahinta dhaqaale ee muhiimka ah iyadoo laga eegayo Wax-soo-saarka Guud ee Gudaha (GDP) iyo qiimaha macaamiisha wax ku iibsadaan.

*Shaxda 1aad – Filashada ama sadaasha dhaqaalaha qaranka.*

| | 2021 | 2022 | 2023 | Saadaasha 2024 | Saadaasha 2025 | Saadaasha 2026 | Saadaasha 2027 | Saadaasha 2028 |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **GDP-ga Magaca ah (USD, Bilyan)** | 9.839 | 10.42 | 11.68 | 12.804 | 13.891 | 15.059 | 16.31 | 17.638 |
| **Koboca GDP-ga dhabta ah (% is-beddelka)** | 3.308 | 2.433 | 2.8 | 3.7 | 3.9 | 4 | 4.1 | 4.3 |
| **Sicir-bararka, sicirrada macaamiisha ee dhammaadka muddada (% is-beddelka)** | 5.667 | 6.056 | 6.601 | 4.3 | 3.7 | 3.5 | 3.3 | 3.1 |
| **Farqiqa waxa ka baxa iyo waxa soo gala (% GDP-ga)** | -6.816 | -8.043 | -9.577 | -8.657 | -8.84 | -10.505 | -10.773 | -10.366 |

**Isha laga soo dheegtey:** WEO Data, IMF, April 2024





**GDP dhabta ah ee qof kasta (LCU joogto ah)**

Soomaaliya ayaa dhameystirtay heerkii ugu dambeeyay ee Barnaamijka deyn cafinta December 2023, iyadoo laga cafiyay deymaha lagu leeyahay oo dhamaa 4.5 bilyan. Tani waxay hoos u dhigtay deymaha dibadda ee lagu leeyahay 65% GDP (2018) ilaa 6% sanadka 2023. Waxaa lafilayaa in taageerada iskaashiga horumarinta ay dibadda ka hesho ay yaraan doonto ka dib marka la dhammeeyo Barnaamijka deyn cafinta, sidaas darteed Soomaaliya waxaa soo foodsaari doono caqabad dheeraad ah, oo ah in ay maalgashato iyo miisaaniyadeeda iyada ay ka maareyndoonto ilaha dakhligeeda. Celceliska kobaca wax-soo-saarka dhabta ah wuxuu ka hooseeyay 3% intii u dhaxaysay 2021-2023 waxaana la saadaaliyay inuu wax yar kor u kaco sanadaha soo socda. Kobaca dhaqaalaha Soomaaliya waxaa inta badan horseeda dhinacyada beeraha iyo adeegyada. Beeruhu

waxay ka ahaayeen in ka badan 60 boqolkiiba GDP tobankii sano ee la soo dhaafay (2011 - 2022), taasoo ka dhigaysa xubinta ugu weyn ee kobaca dhaqaalaha dalka.

Xooluhu waa qaybta labaad ee ugu badan marka laga soo tago beeraha, waxayna ka yihiin ku dhowaad 40% ee GDP-ga. Badeecooyinka ugu muhiimsan ee ay Soomaaliya dibadda u dhoofiso waxaa ka mid ah xoolaha nool oo u dhigma qiyaas ahaan 80% ee guud ahaan dhaqaalaha laga helo wax dhoofinta (NEC Somalia, 2023). Iyadoo heerarka saboolnimada ay sii socdaan – heerka saboolnimada caalamiga ah ($2.15 sanadkii 2017 PPP) iyadoo boqolleyda GDP-ga la saadaaliyay in ay noqonayso 72.1% sanadka 2024. Heerka shaqo la'aanta ayaa waxaa lagu qiimeeyay in ay ahayd 20% sanadkii 2022. Tani waxay la macno tahay in dowladdu ay mas'uuliyad weyn ka saaran tahay in ay shaqo u hesho dad badan oo shaqeynaya. Sicir-bararka waxaa la saadaalinayaa in uu hoos-u-dhaco marka loo eego heerarka sare ee 2021-2023 (muddo ay saameeyeeen cudurka COVID-19 iyo sare u kaca sicirrada caalamiga ah oo sabab u ah dagaalka Ruushka-Ukraine). Xawilaadaha gaarka ah ayaa door muhiim ah ka qaata, waxaa la saadaaliyay in ay noqonayaan 20.4% ee GDP-ga sannadka 2024.




Heerka Saboolnimada

Barnaamijka Sare uqaadida dakhliga gudaha (DRM) si wanaagsan ayuu ugu socdaa dowladda Hirshabelle ee Soomaaliya taasoo daboolaysa baahiyaha dhaqaale iyadoo kor loo qaadayo dakhliga gudaha si looga kaaftoomo ku tiirsanaanta deeqaha caalamiga ah. Bangiga Adduunka waxauu saadaliyay in mashaariicda dib u habeynta dhaqaalaha iyo kordhinta maalgashiga dadweynaha marka la dhammeeyo barnaamijka Dayncafinta HIPC in soo jiidan doontaa maalgashi shisheeye (FDI) iyagoo dhiirigelinaya ganacsiyadda gaarka loo leeyahay. Soomaaliya waxaa weli wajahaysaa tabardari dowladeed, colaado iyo jahawareer cimilo, dhammaan arrimahan ayaa sameeyn kusii lahaan doona kobacyadda dhaqaalaha ee sanadaha soosocda lafilaayo. sii wadi doona inay saameyn ku yeeshaan kobaca hore. Hadhaaga koontada hadda jirta waxaa lagu isticmaala xawaaladaha gaarka ah iyo deeqaha rasmiga ah. Iyadoo badeecadaha la dhoofiyo (Export) ay soo kabsanayaan marka loo eego kuwa lasoo dajiyo, gaar ahaan xoolaha, haddana isu-dheellitirka ganacsiga ayaa la saadaalinayaa inuu noqon doono -58.5 sanadka 2024-ka, waxaana hoos u dhigay badeecadaha la soo dejiyo oo aad u sarreeya iyadoo dalku uu weli aad ugu tiirsan yahay soo dajinta (Import). (World Bank MPO, 2024). Sicir bararka qiimaha waxaa sababay dagaalka Ruushka iyo Ukraine, dagaaladda ka socda wadanka gudahiisa iyo abaarta 2020-2023 ayaa keentay dhibaato qiimaha cuntada. Roobab wanaagsan oo da'ay 2023 ayaa hoos u dhigay qiimaha lakala siisto cuntada. Warbixinta FEWSNET ee bishii May ayaa saadaalisay in helitaanka cunnada daruuriga ah ay caadi ka tahay guud ahaan Soomaaliya iyo tafaariiqda cuntooyinka dibadda laga keeno ay sidoo kale tahay mid deggan. Si kastaba ha ahaatee, meelaha ay ku nool yihiin dadka gudaha ku barakacay (IDPs) ayaa weli ah mid liidata awoodooda wax iibsiga si ay u helaan cunto iyo waxyaabaha muhiimka ah ee aan cuntada ahayn.

### 1.3 DHAQAALAHA GUDAHA

Dowlad Goboleedka Hirshabelle waxaa soo maray caqabado dhaqaale oo baaxad leh oo ay ugu wacneyd tobanaan sano oo xasillooni darro siyaasadeed, iskahorimaadyo hubeysan oo kooxaha nabad-diidka ah. Gobolka waxa uu leeyahay dhaqaale aan rasmi ahayn oo badan, iyada oo aan lahayn xog tirokoob oo la isku halayn karo oo xadidan.

1. Xoolaha: waa qayb muhiim ah oo ka mid ah Dhaqliga Soomaaliya, waxaana ka shaqeeya qayb badan oo ka mid ah dadweynaha, waxna ku soo kordhiya GDP-ga dawladda. Qeybaha ugu badan waa, xoolaha, iyo kalluumaysiga. Dhoofinta Xoolaha ayaa laf dhabar u ahaa Ganacsatada Soomaaliya tan iyo Burburkii Dowladii Dhexe ilaa hadda. Dhoofinta Xoolaha ayaa door muhiim ah ka ciyaara dakhli soo saarka Dowlad goboleedka. Dowlad goboleedka Hirshabelle waxaa xuduud la leh saddex maamul goboleed oo kala ah Galmudug, Koonfur Galbeed, Gobalka Banaadir

iyo dowlad deegaanka Soomaalida Itoobiya oo uu ka dhaxeeyo iskaashi ganacsi, furfurnaanta ganacsigana ay qeyb ka tahay horumarinta dakhliga gudaha ee dowlad goboleedka Galmudug.

2. Xawaaladaha: Lacagaha ay soo xawilaan dadka Soomaaliyeed ee ku nool dalka dibadiisa ayaa ahaa il dhaqaale oo muhiim u ah qoysas badan, waxaana ay kaalin muuqata ka qaateen joogtaynta dhaqaalaha. Xawaaladaha waxay gacan ka geystaan isu socodka nolol maalmeedka qoysaska, maalgashiga, iyo guud ahaan xasilloonida dhaqaalaha.

3. Maadaama Hirshabelle ay ku taallo koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya deegaan ahaan, waxaa jira ganacsiyo badan oo joogto ah oo isaga kala goosha waqooyiga iyo koonfurta Soomaaliya, kuwaasoo dakhli ka soo xarooda.

4. Khayraadka Dabiiciga ah: Hirshabelle waxa ay leedahay khayraad dabiici ah oo ay ka mid yihiin kayd shidaal iyo gaas oo aan wali laga faa'iidaysan, kalluumaysiga iyo macdanta. Si kastaba ha ahaatee, Duruufo Amni iyo in hayadaha dowlad goboleedka aysan awood ulahayn ayaa sababay in aan laga faaideysan kheyraadkaas.

5. Dowladda Federaalka/Taageerada Caalamiga ah: Hirshabelle waxa ay dowladda federaalka iyo beesha caalamka ka heshaa taageero dhaqaale iyo mid farsamo oo baaxad leh, oo ay ku jiraan gargaarka bini'aadantinimo, horumarinta iyo barnaamijyada kobcinta awoodda dowladda. Taageeradaan waxay ujeedadeedu tahay in lagu hormariyo xasiloonida, maamulka, iyo horumarinta dhaqaalaha Dowlad Goboleedka.

6. Horumarinta Kaabayaasha dhaqaalaha: Dhismaha garoon diyaaradeed cusub iyo waddooyinku waxay saamayn weyn ku yeelan karaan dhaqaalaha deegaanka iyadoo loo marayo waddooyin kala duwan. Waa kuwan qaar ka mid ah siyaabaha ugu muhiimsan ee garoonka cusubi uu door muhiim ah u qaadan karo: Kobaca dhaqaalaha iyo shaqo abuurka, soo jiidashada maalgashiga, iyo kor u qaadida dakhliga dawladda.

7.Kalluumaysiga: Qaybta kalluumaysigu waxa ay door muhiim ah ku leedahay dhaqaalaha maxalliga ah, iyada oo si weyn uga qayb qaadanaysa wax-soo-saarka guud Maamulka, shaqaaleeysiinta, sugnaanta cuntada, iyo ganacsiga. Bayaankani wuxuu qeexayaa siyaabaha kala duwan ee kalluumaysigu u kobciyo xasilloonida dhaqaalaha iyo kobaca, taageerayana yoolalka istiraatijiyadeed ee sannad maaliyadeedka soo socda. Si kastaba ha ahaatee, waxaa xusid mudan in xaaladda Hirshabelle ay tahay mid cakiran oo kaladuwan, dhaqaalaha guud ee deegaankana waxaa ka taagan caqabado kala duwan oo ay ka mid yihiin, arrimo amni, iyo saameynta isbedelka cimilada.


Hirshabeelle waxa ay leedahay beero ay ka baxaan khudaar, dalagga saliidda laga sameeyo, badar, iyo sisin; iyo sidoo kale leh dhul xeebeedka kalluumaysiga ku fiican waxaana dadka deegaanka can ku yihiin dhaqashada xoolaha sida ariga iyo geela.

Dowlad-goboleed waa kan ugu badan ee soosaara sisinta dalka. Marka laga soo tago sisinta wuxuu sidoo kale soo saaraa dalagyada ee beeraha kale sida galleyda, digirta, bariiska, iyo khudaarta.


Dowlad-goboleedka waxaa mara ilaa 600 km oo webiga Shabeelle ah. Waxaa suuragal ah in looga faa'iideysto soosaarka miraha suufka oo ganacsi mug leh laga sameyn karo. Gabbal-daye iyo digirta sooya ayaa sidoo kale laga beeri karaa. Dhul-beereed aad u baaxad weyn oo ku yaalla gobolka Shabeellaha dhexe ayaa diyaar ah lana awoodi karaa. Dowlad-goboleedka waxaa uu leeyahay hal dekad oo lagu magacaabo Ceel-macaan.

## 1.3 QIIMAHA MACIISHADA GUDAHA


Jaantusyada hoose ayaa muujinaya dhaqdhaqaaqa qiimaha xoolaha muhiimka ah iyo qiimaha dalagga ee Hirshabelle. Hirshabelle maamul soo saara xoolaha




Qiimayaasha sanadka hadda waxay muujinayaan kor u kac mug leh bishii Disembar 2023 iyo bishii Jannaayo 2024, waxaanna ku xigay hoos-u-dhac degdeg ah oo ku yimid laga bilaabo bishii Febraayo iyo wixii ka dambeeyay, waxay ka sii hooseeyeen qiimayaasha sanadkii hore min Maarso ilaa Abriil.




Sanadka hadda wuxuu muujinayaa isbeddel hoos-u-dhac ah oo ku yimid qiimayaasha laga bilaabo bishii Jannaayo, kaas oo aad uga duwan qiimayaashii xasilnaa ee sanadkii la soo dhaafey oo qiyaastii ahaa 45,000 SOS/kg intii lagu guda jiray muddadii la odorosey.




Qiimayaasha lo'da tayada degaanka ah ee sanadkan waxay muujinayaan in ay heerkii ugu sarreeyay gaareen bishii Disembar 2023, waxaanna xigay hoos-u-dhac aad u hooseeya min Febraayo 2024 iyo wixii ka dambeeyay. Qiimayaasha sanadka hadda waxay si joogto ah ugu hooseeyaan qiimayaasha sannadkii hore laga bilaabo Febraayo ilaa Agoosto, in kastoo uu isku soo dhowaansho kooban uu jiray bishii Nofembar wuxuunna heerkii ugu sarreysay gaarey bishii Disembar.

## 1.4 SIYAASADDA GUUD

Qaybtani waxa ay qeexaysaa siyaasadaha ugu muhiimsan ee ay wasaaradaha iyo hay'aduhu doonayaan in ay ku gaadhaan sanad miisaaniyeedka cusub. Mudnaanta siyaasadda waxa hoosta ka xarriiqay Qorshaha Horumarinta Qaranka. Marka lajoogo Heer Maamulgoboleed, Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah (MoPIC) ayaa iyada oo kaashanaysa Wasaaradaha kale ee Hirshabelle, waxay dejin doontaa qorshe mudnaan gaar ah leh oo la jaan qaadaya Qorshayaasha mudnaanta u leh Qaranka, balse tixgalinaysa maal-gashi dadweyne dowlad goboleedka gaar u ah, sidoo kale lagama maarmaar u ah si loo gaaro waqti dheer kobac dhaqaale iyo xasilooni balaaran.

### Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo tan Dowlad-goboleedka Hirshabelle

Qorshaha NDP waa qaabka guud ee siyaasadda ugu muhiimsan ee taageeraya ujeeddooyinka siyaasadda horumarinta bulsho-dhaqaale e Dowladda Federaalka ee sanad-maaliyadeedyada 2020 ilaa 2024. Istiraatiijiyadda saboolnimada ee qorshaha horumarinta qaranka (NDP) ee 9aad waxay ka kooban tahay afar tiir: 1) Siyaasado Loo Dhan Yahay oo La Fahmi Karo, 2) Amniga iyo Talinta Sharciga oo Wanaagsan, 3) Koboc Dhaqaale oo Loo Dhan Yahay (oo uu ku jiro shaqo kororka) iyo, 4) Horumarinta Bulshada oo Wanaagsan.

Marka diiradda la saaro waxqabadyada afartan tiir, Soomaaliya waxay wax ka qaban doontaa waxyaabaha aasaasiga ah ee saboolnimada keena. Tiirarkan habeynta waxay la jaanqaadaan saddexda mudnaan ee horumarinta qaranka ee la tilmaamay. Siyaasado dhinac kasta taabanaya (aasaasi ah) ayaa la dhexgaliyaa tiir kasta, oo ka dhigan istiraatijiyad muhiim ah oo ah mid lagu beegsanayo oo mudnaan lagu siinayo waxqabadyada:

- Xoojinta arrimaha qoyska, xuquuqul insaanka iyo noocyada kale ee sinnaanta bulshada
- Dhisidda adkeysiga qoysaska, bulshooyinka iyo dowladda
- Si wanaagsan u maareynta deegaanka Soomaaliya iyo kheyraadkeeda dabiiciga ah
- Mudnaansiinta xalalka waara ee barakaca muddada-dheer
- Xoojinta wada-tacaamulka u dhaxeeya qorsheynta bani'aadamnimada iyo horumarinta
- Ka dhigidda horumarka maamulka mudnaanta tiir kasta

### 1.4.1 Qorshaha Isbeddelka Qaranka

**Ujeeddooyinka muhiimka ah ee Qorshaha Isbadalka Qaranka**

- In uu Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) ku hago waxqabadyada horumarinta iyo maalgashiga shanta sano ee soo socota (2025-2029).
- In uu u shaqeeyo sida qorshaha khariidadda (roadmap) qaabeysan ee loogu talagalay horumarinta bulsho-dhaqaale ee Soomaaliya.
- In uu kor-u-qaado isla-jaanqaadidda iyo wada-shaqeynta hindisayaasha horumarinta kala duwan ee ka socda guud ahaan Dowladda Federaalka Soomaaliya.
- In uu dhiirrigeliyo iskaashiga ka dhaxeeya daneeyayaasha kala duwan ee ku lugta leh qorsheynta bani'aadamnimada iyo horumarinta.
- In uu Soomaaliya awood u siiyo wax-ka-qabashada iyo ka gudubka caqabadaha horumarineed.
- In uu bixiyo jihada qoondeynta kheyraadka si loo sii wado horumarinta qaranka iyo barwaaqada. Qorshaha NTP wuxuu ka dhigan yahay in laga guurey qorshaha horumarinta ee soo jireenka ah iyadoo loo guurey istiraatijiyadda isbeddelka aad diiradda lagu saarayo.

# 2 QAAB-DHISMEEDKA MAALIYADDA

**Qaybtan waxay diiradda saareysaa**

1) dhaqaalaha guud ee miisaaniyad-sannadeedka, oo loo qaybiyo dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda iyo amaahda iyo ii) Istaraatiijiyadda kobcinta dakhliga. Soomaaliya habka sameynta miisaaniyaddu waxa uu muhiim ah, tusaale ahaan, Qeyraadka loo heli karo Kharashaadka Miisaaniyadda Dawladda. Kuwaas oo kala ah dakhliga la qiyaasayo inuu ka imaanayo canshuuraha guddaha iyo canshuurta aan dakhliga ahayn iyo deeqaha Dowlada Federaalka iyo kuwa caalamiga ah.

Dawladdu sida uu qabo sharciga PFM waa in ay kharashaadkeeda ku koobto dakhliga laheli karo si loo gaadho dheelitiran ee miisaaniyadeed, kaas oo fure u ah ilaalinta xasiloonida dhaqaalaha.

Sanadka FY2025, qaab-dhismeedka maaliyadeed iyo Saadaasha waxa lagu dhisay mabaadi'da maaliyadeed ee soo socota::




### 2.1.1 Dakhliga Gudaha

Dakhliga gudaha sanadaha ina soo aadan waxaa diiradda lagu saarayaa in la hubiyo balaadhinta nidaamka Maareynta Maaliyadda Dawladda (PFM) iyo horumarinta habka aruurinta canshuurha iyadoo loo maraayo in loo hogaansamo maamulka canshuurha. Jadwalka hoose wuxuu muujinayaa in Hirshabelle sida Maamul goboleedyada kale ay aad ugu tiirsan tahay deeqaha. Wadarta guud ee ururinta dakhliga gudaha ayaa kor u kacay 2021 waxana uu kor u kacayay si joogto ah sannad kasta sababtoo ah dawladdu waxay lahayd siyaasad iswaafajin cashuureed oo la dajiyay. (kordhinta cashuuraha -Furdooyinka- iyo dakhliga aan cashuurta ahayn) isidoo kale sanadkii 2021 waxaa hoos u dhac ku yimid Deeqaha.

**Tusaha soo socota** ee hoose wuxuu muujinayaa Hirshabeelle in sida Dowlad-goboleedyada kale ay aad ugu tiirsan tahay deeqo. Wadarta guud ee dakhliga gudaha laga ururiyay ayaa sii kordhayey sanad walba tan iyo 2017, marka laga reebo 2019 (oo hoos-u-dhac ku yimid canshuurta –kastamka- iyo dakhliga aan canshuurta ahayn) iyo 2021 oo jiray hoos-u-dhac ku yimid deeqaha.*Shaxda 2aad – Taxanaha Dakhliga Maamulka Galmud*

| Dakhliga Guud | 2018 | 2019 | 2020 | 2021 | 2022 | 2023 | Trends over time |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Dakhliga Canshuurta** | 669,061 | 797,607 | - | 1,410,981 | 2,160,268 | 3,893,782 | |
| Canshuurta Mushaarka - Dowladda | - | - | - | - | 68,611 | 114,596 | |
| Canshuurta Mushaarka - Aan Dowladda Ahayn | - | 273 | - | 18,790 | 223,396 | 349,954 | |
| Canshuurta Guryaha | - | - | - | - | 24,364 | - | |
| Canshuurta Macaashka | - | - | - | 740,205 | 99,808 | 952,069 | |
| Ujuurada Rakaabka Maxalliga ah | - | - | - | - | 1,260 | 770 | |
| Canshuurta Isticmaalka Waddada | 533,269 | 797,333 | - | 651,986 | 1,459,207 | 1,753,343 | |
| Canshuurta Kastamka - Jaadka | 135,792 | - | - | - | 190,000 | 399,175 | |
| Dakhli Ururinta ka timaado Dowladda hoose | - | - | - | - | 93,621 | 323,875 | |
| Cansnuurta dakhliga shakhsiyed ee shaqalaah Dowladda | | | | | | | |
| **Deeqaha** | 2,615,476 | 5,183,746 | 10,074,411 | 3,392,187 | 8,842,759 | 11,349,140 | |
| Deeqaha Hadda Ka Imaada Ururrada Caalamiga ah | 258,476 | 653,946 | 385,814 | 203,281 | 127,636 | 2,369,831 | |
| Deeqaha ka yimaada Dowladda Federaalka Soomaaliya | 2,357,000 | 4,529,800 | 9,688,597 | 3,185,906 | 8,715,123 | 8,979,310 | |
| Deeqaha ka yimaada Dowladda Hoose - Hirshabeelle | - | - | - | 3,000 | - | - | |
| **Ilaha Kale ee Dakhliga** | 4,502 | 3,472 | - | 370,000 | 1,129,586 | 133,264 | |
| Diiwaangelinta NGO Maxalliga ah | - | - | - | - | 11,400 | 12,600 | |
| Ujuurrada adeegyada waxbarashada | - | - | - | - | 31,186 | 47,018 | |
| Shatiyada Ganacsiga iyo Xirfadda | - | 400 | - | - | 120,000 | 50,000 | |
| Ujuurrada Kalluumeysiga | - | - | - | 30,000 | 27,000 | - | |
| Ujrada Laga Qaado Diyaaradaha Soo Dega | - | - | - | 90,000 | 20,000 | - | |
| Ujrada Xoolaha | 4,502 | 3,072 | - | 250,000 | 130,000 | - | |
| Ujurada Beeraha | - | - | - | - | 15,000 | - | |
| Ujrada Is-Diiwaangelinta Doorashada | - | - | - | - | 775,000 | 7,000 | |
| Ujurada Dal-kugalka | - | - | - | - | - | 1,645 | |
| Canshuuraha Ruqsadda Shaqada | - | - | - | - | - | 10,600 | |
| Ujurada xareynta dacwadaha maxkamadda | - | - | - | - | - | 4,401 | |
| **Wadarta Guud** | 3,289,040 | 5,984,825 | 10,074,411 | 5,173,168 | 12,132,613 | 15,376,186 | |

**Sanadkii 2020 ma jirin wax dakhli canshuur ah oo soo xaroodey iyadoo ay sabab u tahay xasilooni la'aan siyaasadeed laakiinse dakhliga canshuurta ee 2021 iyo 2022 ayaa si joogto ah u kordhey. Isha kale ee dakhliga 2022 ayaa korortey, kororkaasina waxaa keenay lacagaha isdiiwaangelinta ee doorashada, oo aan la qaadin sanadkii 2023, taas oo keentay hoos u dhac ku yimid ururinta Isha Kale ee Dakhliga 2023.**

Saadaasha deeqda ayaa waxaa ku dhawaaqa dowladda federaalka kaliya saddexda bilood ee danbe(Q3). **Qaabka cusub ee dakhliga ee la soo bandhigay sanadkii 2023 ayaa sameeyay** saadaasha dakhliga gudaha ee isha dakhliga gaarka ah (canshuurta iyo kan aan canshuurta ahayn) wuxuunna muujinayaa **hoos-u-dhaca kharashaadka la beegsanayo ee ay tahay in lagu bixiyo ama daboolo deeqaha**. Saadaasha dakhliga ee kama-dambeysta ah ee 2024 iyo 2025 ayaa la xisaabiyay, iyadoo la adeegsanayo hababka weydaarka iyo dhexeeyaha, iyo celceliska ururinta.

Iyadoo lagu saleynayo dakhli ururinta Jan- Abriil 2024 , ururinta dakhliga isha gaarka ah ee 2024 markii dib loo saxey waxay noqotey USD 6.6 milyan, iyo USD 8.7 milyan ee 2025.

*Tusaha1 – Dakhliga La Saadaaliyay iyo Kan Dhabta ah (Hore)*

| | 2023 | SAADAASHA KAMA DAMBEYSTA AH | Kororka 2024/23 | SAADAASHA KAMA DAMBEYSTA AH | Kororka 2024/25 |
|---|---|---|---|---|---|
| | Dhabta ah | 2024 | | 2025 | |
| Dakhliga canshuurta | 3,893,782 | 6,149,687 | 58% | 7,473,505 | 33% |
| Dakhliga Aan Canshuurta Ahayn | 133,264 | 478,974 | 259% | 550,520 | 15% |
| Wadarta dakhloga gudaha | 4,027,045 | 6,628,660 | **65%** | **8,026,025** | 21% |
| **Deeqda dowlada faderalka** | | | | **2,722,096** | |
| **Wadarta Guud** | | | | **10,748,120** | |

### Ballanqaadyada dakhliyadda Dibadda ( Deekha dibadda)

"Inta lagu jiro FY2025, wadar dhan $29,398,473 oo kaalmo dibadeed ah ayaa la saadaalinayaa in lagu taageero miisaaniyadda, tani waa wadarta deeqaha laga filaayay hay'adaha caalamiga ah, dawladaha shisheeye, iyo DFS. Shaxda hoose waa qiyaas laakiin waxay u baahan yihiin in la dhamaystiro. Tiradani kuma jirto $2.72 milyan oo laga filayo FGS, oo kor ku xusan xisaabinta dakhliga gudaha. Waa muhiim in la xuso in qiyaastani ay ku saleysan tahay qiyaasaha laga helay DFS iyo deeq-bixiyaasha caalamiga ah."

### Khatarta ka timaadda Maaliyadda Aan degganayn

Ku tiirsanaanta sanadkii hore ee kaalmada dibadeed waxay macnaheedu ahayd in qiyaasaha dakhliga lagu guuldareystay in ay buuxiyaan filashooyinka, oo badanaa sabab u ah arrimo siyaasadeed, maamul, iyo kuwo farsamo iyo in hay'adaheenna gudahoodu ay ka jiraan la'aanta awoodda aqoonsashada iyo adeegsiga. Heerka lacag-bixinta deeq-bixiyayaasha ee hooseeya waxay badanaa jawaab u tahay qaadashada/adeegsiga hooseeya ee Wasaaradaheenna gaar ahaan ay sabab u tahay u hoggaansamid la'aanta shuruudaha deeq-bixiyayaasha. Soomaaliya si ay ugu guuleysato deyn cafinta loo marayo Hindisaha Dalalka Saboolka ah ee Aadka u Qaameysan (HIPC), qaabka maalgelinta bah-wadaagta horumarinta waxay ka beddelmi doontaa deeqo iyadoo noqoneysa deyn, sii wanaajinta DRM ayaa muhiim noqon doonta si loo xaqiijiyo in ay ka soo bixi karto ballanqaadyadeeda deymaha.

## Istaraatiijiyadda Kordhinta Dakhliga

Ka-dib dhammeystirka hindisaha Dalalka Saboolka ah ee Aadka u Qaameysan /*Heavily Indebted Poor Countries Initiative (HIPC)*, Dowlad-goboleedyada Soomaaliya waxay sii wadi doonaan in ay wax-ka-qabtaan dib-u-habeynta abaabulka dakhliga gudaha. Tani waxaa ka mid ah diyaarinta bayaanka siyaasadda canshuurta iyo wax-ka-beddelka shuruucda dakhliga ee jira. Waxaa socda dadaallo lagu kordhinaya dakhliga gudaha, kaas oo si weyn gacan uga geysan kara kordhinta kharashaadka horumarinta, iyo muddo kadib in la yareeyo ku tiirsanaanta deeqaha miisaaniyadda dibadda uga imaanaya. Dib-ugu-noqoshada sharciga dakhliga iyo bayaanka siyaasadda canshuurta waxay muhiim u tahay taageeridda dadaalladan dib-u-habeynta.

Tan iyo 2014, dowlad-goboleedka wuxuu qaadayey dakhliga ka soo xaroonaya ilo kala duwan oo waafaqsan shuruucda iyo xeernidaamyada dowlad-goboleedka u degsan. Dakhliga waxaa ururiya Wasaaradda Maaliyadda iyo wakiillada canshuur ururinta oggolaanshaha u haysta waxaanna lagu xisaabiyaa xisaabaheeda ee sanad walba la baaro.

Dowlad-goboleedka waxay dib diiradda u saareysaa dadaalladeeda ku saabsan dakhli ururinta, ka-dib heshiis qaran oo ku saabsan qoondeynta isha dakhliga, ilaha dakhliga gaarka u ah dowlad-goboleedka (ilaha dakhliga muhiimka ah waa: canshuurta guryaha, canshuurta guri wareejinta, canshuurta isticmaalka waddada dowlad-goboleedka, ujuurooyinka suuqa iyo beeraha, iyo ujuurooyinka diiwaangelinta gaadiidka iyo shatiga). Intaa waxaa dheer, dowlad-goboleedku in ay qaadan doonto dakhli ururin iswaafaqsan oo ka imaanaysa canshuuraha la wadaago, oo ay ku jiraan canshuurta dakhliga shakhsiga, canshuurta dakhliga shirkadaha, canshuurta iibka, iyo canshuurta dakhliga kirada ah.

Dowlad-goboleedka wuxuu eegi doonaa in uu iswaafajiyo waxyaabaha uu canshuuri doono (waxa ama cidda la canshuurayo) iyo qiimaha canshuurtiisa (xaddiga canshuurta la bixinayo), isaga oo la jaanqaadaya dowlad-goboleedyada kale iyo Dowladda Federaalka. Markii hore, waxaa uu qaatey qiimayaasha canshuurta qaranka oo dhan la isku waafaqay ee canshuurta dakhliga shakhsiga wuxuuna sii waafajin doonaa waxyaabaha la canshuuro (loogu talagalay PIT, noocyada shaqaalaha iyo dakhligooda). Iyadoo uu maanka ku hayo ujeeddada iswaafajintan, ayuu dowlad-goboleedka wuxuu sameeyay daraasad lagu oggaanayo dakhliga suuragalka ah si loo aqoonsado dakhliga suuragalka ah ee muddada-dhexe (3 ilaa 6 sano ee soo socda), iyadoo la tixgelinayo duruufaha ka jira dowlad-goboleedka.

Dowlad-goboleedka wuxuu diyaarinayaa sharci cusub oo dhaqangelinaya ilaha dakhliga iswaafaqsan iyo qiimayaasha canshuurta. Sharciga cusub wuxuu ku soo rogi doonaa canshuuro cadaalad ah, fudud oo aad wax-ku-ool u ah ilahan dakhliga, sidaa daraaddeed canshuurta midkoodna ma noqoneysa mid xad-dhaaf ah ama adag in la fahmo iyo in loo hoggaansamo. Muddada-dhexe, dakhli ururinta waxaa diiradda lagu saari doonaa canshuurta dakhliga shakhsiga ee lagu soo rogo shaqaalaha, canshuurta macaashka la qiyaasey ee ganacsiga, canshuurta isticmaalka waddada, ujuurooyinka diiwaangelinta gaadiidka, iyo dhowr khidmadaha iyo ujuurooyinka adeegga ah. Ilaha dakhliga waxaa lagu sameyn doonaa dib-u-eegis joogto ah si loo qiimeeyo waxqabadka iyo si loogu xisaabtamo ballanqaadyo kastoo cusub ee dowladda federaalka iyo iswaafajinta.

**Dakhliga kastamka**

Isbeddelo mug leh ayaa dhacey tan iyo 2023, oo ay ka mid yihiin in Soomaaliya ay saxiixday laba heshiisyo caalami ah: Heshiiska Ganacsiga Xorta ah ee Dalalka Carabta ah (GAFTA) iyo heshiiska ku biirista Ururka Bulshada Bariga Afrika (EAC). Heshiisyadan waxaa ka mid ah Heshiisyada Ganacsiga Xorta ah (FTAs) ee baabi'iya canshuuraha laga qaado alaabooyinka ay isdhaafsadaan/ka ganacsadaan dalalka xubnaha ka ah. **Waraaqda ay ku Shaqeeyaan Golaha Dhaqaalaha Qaranka, Oktoobar 2023: Qiimeynta Suuragalnimada Ku Biirista Soomaaliya Bulshada Bariga Afrika waxay sheegaysaa in:**

- Dakhliga gudaha Soomaaliya uu aasaasi ahaan ka yimaado canshuuraha kastamka.

- Waa muhiim in Soomaaliya ay kala nooc-nooc ka dhigto ilaha dakhligeeda iyo in ay yareyso ku tiirsanaanta ay ku tiirsan tahay canshuuraha kastamka ka soo xaroodo.
- Meelaha la soojeediyay in canshuuraha lagu kordhin karo waxaa ka mid ah alaabooyinka iyo adeegyada (VAT), dakhliga, iyo faa'iidooyinka.

Dakhliyada kastamka ka soo xarooda waxaa la filayaa in uu hoos u dhaco marka la eego boqolleyda wadarta dakhliga dowladaha ku biiraya ururka EAC. Si kastaba ha ahaatee, hoos-u-dhaca ayaa noqon kara mid aad u yar oo sabab u ah kororka ganacsiga u kala goosha dowladaha xubnaha ka ah Ururka Bulshada Bariga Afrika (EAC) iyo u hoggaansamidda qodobbada Borotakoolka Midowga Kastamada Ururka EAC, taas oo suuragal ah in ay kor u qaado dakhliga ururinta laga helo ganacsiga caalamiga ah iyo canshuuraha gudaha.

DFS waxay dhaqangelisay xeernidaamyo sii wanaajin doona u hoggaansamidda, oo keenaya dakhli wanaagsan in uu soo xaroodo; xeernimaadyadan waxaa ka mid ah:

- Xeernidaamyada Dallaalka Kastamka. Xeernidaamyadan waxay sii wanaajin doonaan maamulka Dallaaliinta Kastamka, iyagoo xaqiijinaya in dhammaan Dallaaliinta ay haystaan warqadaha looga baahan yahay si ay Dallaal u noqodaan iyagoo imtixaan ka gudbaya ka hor inta aan shati la siin.
- Xeernidaamyada Fulinta Kastamka. Kuwani waxay dhigayaan awoodaha iyo waajibaadyada muhiimka ah si saraakiisha kastamka ay suuragal ugu noqoto in ay dhaqangeliyaan Sharciga Kastamka. Xeernidaamyada waxay bixinayaan awoodaha lagu qabanayo alaabooyinka laguna dabaqayo ciqaabo marka fal-dambiyeedka Kastamka la geysto.

SOMCAS ayaa ku guda jirta in si buuxda looga hirgeliyo DFS iyo Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (JSS), waxaa lagu rajo weyn yahay in lagu guuleysto bisha Luuyo/Agoosto 2024. Hirgelinta tallaabooyinka fududeynta ganacsiga ayaa waxaa ku soo kordhay dhiirrigelin cusub ka-dib markii lagu biiray ururka EAC. Soomaaliya waxaa laga filayaa in ay qaadato oo ay dhaqangeliso Xeerka Suulinta Caqabadaha Aan Canshuurta Ahayn 2027 ee EAC, in ay ku biirto Ururka Ganacsiga Adduunka (WTO) iyo ansaxinta Heshiiska Fududeynta Ganacsiga ee WTO. Tallaabooyinka waxay sii wanaajin doonaan hufnaanta dhaqdhaqaaqa alaabooyinka isaga kala goosha xudduudaha Soomaaliya iyo dhiirrigelinta maalgashiga caalamiga ah. Soomaaliya waxaa sidoo kale laga doonayaa in ay hirgeliso Heshiiska Qiimeynta WTO, iyadoo la jaanqaadeysa xeerarka qiimeynta EAC oo xisaabinaya qiimaha Kastamada ee alaabooyinka iyadoo la adeegsanayo qiimaha la bixiyay ama la bixin karo.

Lumin kastoo suuragal ah ee dakhliga kastamka ee lagu lumiyo TFAs waxaa lagu yareyn karaa hirglinta in badan oo ka mid ah tallaabooyinka kor ku xusan.

# 3-1 KHARASHAADKA

Qaybtan waxay diiradda saareysaa tallaabooyinka kharashaadka sanad maaliyadeedka 2025 iyo qaabka xaddiga lacagaha ugu badan ee BFP. Arrimaha jiritaankooda lagu xisaabtamey ee qaabka xaddiyada lacagaha ugu badan ee MDA ayaa la sharxey waxaanna la soo bandhigey xaddiyada lacagaha ugu badan ee gaarka ah ee ku-meelgaarka ah.

### 2.1.2 Kharashaadka

Waraaqda BFP ee hadda qabyada ah waxay bixinaysaa baahida ugu yar ee wasaarad kasta (ballanqaadyada go'an iyo mushaaraadka). Kharashaad dheeraad ah ayaa la siiyaa wasaarad kasta oo ku saleysan xaaladda mudnaanta siyaasadeeda. Wadarta xaddiga kharashaadka aan laga sare mari karin ayaa waxaa lagu dheellitiraa isha gaarka ah ee dakhliga dowlad-goboleed kasta. Deeqaha dheeraadka ah ee laga helo DFS, deeq-bixiyayaasha ee loogu talagalay mashaariicda, iyo mushaaraadka laguma tixgeliyo qiyaastan, maadaama macluumaadka dhammeystiran ee sanad maaliyadeedka 2025 aan weli la heli karin. Waxaa la filayaa in Waaxda Miisaaniyadda ay u qoondeyn doonto maaliyadaha 2025 laga filayo DFS iyo deeq-bixiyayaasha si ku saleysan mudnaanaha siyaasadda. Maaliyaddan waxaa lagu dari karaa qoraalka labaad ee waraaqda BFP.

## 2.2 HINDISAYAASHA MUHIIMKA AH

Dowlad Goboleedka Hirshabelle waxay si dhow ula shaqayn doontaa DFS, waxayna qaadan doontaa istiraatijiyad la mid ah tii ay dawladda federaalka Soomaaliya u soo bandhigtay Qorshaha Horumarinta Qaranka. Haddaba, istiraatijiyadda waxaa wax looga qabanaaya caqabadahan qalafsan, si wax ku ool ahna loogu horseedi doono Soomaaliya wadada soo kabashada iyo horumarka

**Hindisaha Muhiimka ah:** nabad waarta, waxaa ka mid ah:
Amniga iyo Sareynta Sharciga.
• Barnaamijyada qorista iyo tababarada ciidamada sida booliiska, militariga, iyo hay'adda Sirdoonka.
• Kobcinta awoodda sirdoonka, hawlgallada lala beegsanayo kooxaha fallaagada ah, iyo barnaamijyada
ladagaalanka xagjirnimada.
• Hirgelinta hindisayaasha Booliseeynta bulshada iyo lafalgalka bulshooyinka si loo dhiso kalsooni iyo iskaashi.
**Wax ka qabashada Isbeddelka Cimilada:**
• Samaynta xarun dib-u-soo-noolaynta geedaha
• Ka hortagga xaalufinta dhirta iyo maaraynta dhul daaqsimeedka si waara
• Joojinta isticmaalka dhuxusha
**Dawladnimada iyo ku dhaqanka sharciga**
• Dib u habaynta iyo hagaajinta nidaamka garsoorka, oo ay ku jiraan tababarida garsoorayaasha iyo shaqaalaha sharciga ka shaqeeya.
• Tallaabooyin ka dhan ah musuqmaasuqa ka dhex jira hay'adaha amniga iyo maamulka.
• Fududeynta wada-hadallada, shirarka nabadda, iyo dadaallada dhexdhexaadinta ee beelaha.
• Hindisaha lagu hubinayo in beelaha oo dhan ay si cadaalad ah uga qaybgalaan qaab-dhismeedka maamulka iyo habka xalinta khifaadka soo jireenka ahaa loo badalo hab sharci ah
**Maamul Wanaaga iyo Siyaasada loo dhan yahay**
• Dib u habaynta iyo hagaajinta nidaamka garsoorka, oo ay ku jiraan tababarida garsoorayaasha iyo shaqaalaha sharciga.

• Xoojinta hawlaha hanti dhawrka dawladda iyo dhaqan gelinta siyaasadaha la dagaalanka musuqmaasuqa
• Horumarinta nabadda iyada oo loo marayo ololeyaal wacyigelineed oo bulshadu waddo.
• Ka qayb galka muwaadiniinta nidaamka siyaasadda iyada oo loo marayo codbixin, la tashi dadweyne,
iyo waxbarashada madaniga ah
• Dejinta shuruuc ilaalinaysa ka-qaybgalka, matalaadda, iyo xuquuqul insaanka waxay dhiirigelisaa deegaan loo dhan yahay.
• Hindisaha lagu hubinayo in beelaha oo dhan ay si cadaalad ah uga qaybgalaan qaab-dhismeedka maamulka iyo isku dhafka dhaqanka ee xallinta khilaafaadka nidaamka sharciga ah.

**Horumarinta Dowladaha Hoose**

• In la siiyo tababaro iyo agab saraakiisha dawladda hoose.
• Hirgelinta nidaamyada la socodka waxqabadka waxtarka bixinta adeegga.
• Abuur habab xog ururin si loo qiimeeyo waxqabadka dawladda hoose.

Dib u habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladda

• Barnaamijyo tababar oo dhamaystiran oo la siinayo saraakiisha dawladda ee ku saabsan miisaaniyadsamaynta, maamulka maaliyadda, iyo hanti-dhawrka.
• Casriyeynta nidaamyada cashuuraha si loo horumariyo hufnaanta iyo u hoggaansanaanta.
• Tababarka loo fidinayo Canshuur uruuriyeyaasha iyo hirgelinta barnaamijyada waxbarashada cashuur-bixiyayaasha.
• Xoojinta hababka ururinta iyo maaraynta dakhliga aan cashuurta ahayn.
• Xoojinta kontaroolada gudaha iyo hababka dabagalka kharashaadka

**Beeraha iyo Barnaamijyada Maciishada**

• Taageerida mashaariicda beeraha iyo barnaamijyada kale ee hab-nololeedka si loo yareeyo rajoxumada dhaqaale.
• Dhisidda suuqyo iyo goobo lagu kaydiyo wax-soo-saarka beeraha.
• Dhisidda rugaha caafimaadka xoolaha iyo unug guur-guura oo bixiya tallaal joogto ah iyo barnaamijyo xakameyn ah.
• Samaynta xarumo cilmi-baaris oo diiradda saaraya caqabadaha beeralayda maxalliga ah.
• Cilmi-baadhis ku saabsan xakamaynta cudurrada, taranka, iyo horumarinta quudinta.

**Horumarinta Kaabayaasha dhaqaalaha:**

• Maalgelinta waddooyinka dawladda hoose si loo kiciyo kobaca dhaqaalaha.
• Maalgelinta lagu sameeyay garoonka diyaaradaha ee caasimadda Galmudug si loo kobciyo kobaca dhaqaalaha.
• Dayactir lagu sameeyay wadooyinka u dhaxeeya Gaalkacyo iyo Guriceel

**Waxbarashada**

• In laga dhiso ugu yaraan lix dugsi oo cusub aagga xorriyadda.
• Tababarka iyo qorista macallimiinta.
• Bixinta agab waxbarasho.

**Caafimaadka**

• Dhisidda iyo qalabaynta xarumaha caafimaadka iyo rugaha caafimaadka.
• Qoritaanka iyo tababbarka shaqaalaha daryeelka caafimaadka.
• Bixinta dawooyinka lagama maarmaanka ah iyo saadka.

**Biyaha, Fayadhowrka, iyo Nadaafadda (WASH)**

• Dhismaha shan ceel oo cusub
• Dayactirka saddex ceel


**WARAAQDA qaab Dhismeedka Miisaaniyadda**

Warqada qaabdhismeedka Miisaniyaada – waxa ay isku mideeyneysa Qorshaha horumarinta Qaranka, Yoolalka Horumarin Waara ee Caalamiga ah, iyo Qorshoyaasha mudnaanta leh ee dowlad goboleedka. Sannadaha soo socda, geeddi-socodkani waxa uu noqon doonaa dadaal dowladeed oo loo dhanyahay iyada oo dhammaan Wasaaradaha, waaxyaha iyo wakaaladaha dowlad goboleedka ay ka qeyb qaadan doonan markeey noqoto habka loo qorsheynayo, mid walbana uu soo saarayo qorsho howled faahfaahsan oo qeexaya ujeedooyinka siyaasadeed ee gaarka ah, hawlaha, tilmaamayaasha waxqabadyadda muhiimka ah, iyo soo jeedinta Kharashaadka kubaxaya.

## SIDEE LOO SAMEEYA XADIDKA QARASHAADKA

Si loo go'aamiyo shuruudaha Wasaarad walba looga baahan yahay Miisaaniyadda cusub waa in lakala saaro. 1) Shuruuda ugu yar: Waa maxay shuruudah ugu yar ee loo baahan yahay si loo sii wado hawlaha hadda socda iyo siyaasadahooda, sidoo kalana loo fuliyo ballan-qaadyadii hore (sida kirada, biyaha iwm) 2) Dakhliga dheeriga ah: Maxeey yihiin waxyaabaha mudnaanta kowaad leh ee miisaaniyada sanadkan.

**Xadidaada kharashaadka waxaa loo sameeya sidatan**




**Mushaharka:** waxa uu ku xiran yhay hadba shaqaaleysiinta horey u dhacday, waxaan isku dayeynaa inaan go'aamino kharashka u hooseeya ee mushaharka loo baahan yahay si loo daboolo baahiyaha shaqaale ee hadda jira, iyadoo lagu saleynayo kharashyada 2022

**- Taageerada Deeq-bixiyayaasha**: waxaa loo qoondeeyay wasaarado gaar ah, iyadoo ay daboolayaan Mashaariicda sida RCRF iyo kuwa kale.

**- Balankhaadyadda go’an:** waa qarashka loo baahan yahay si loo daboolo baahiya aasaasiga ah sababtoo si loo gaaro yoolalka (tusaale kirada dhismayaasha, korontadda ay isticmaalayaan dhismayaashan) sida kuxusan Misaaniyadda 2024

**- Kuwa kale:** waa kharashaadka cusub ee 2025 taasoo u ogolaan doonta Wasaaradaha inay ballaariyaan shaqaaleysiintooda, iyo ajandayaasha kale ee muhiimka u ah

**Ujeedada miisaaniyaddu waa in la qoondeeyo maalgelin cusub, iyada oo la raacayo tilmaamahan**

| |
|---|
| **Hagayaasha Siyaasadda Maaliyadda -** Ma jiro koror ballaadhan oo mushahar ah: mushaharka Looma kordhiyo sanadba sanadka ka dambeeya shaqaalaha, markaa heerarka mushaharku wuxuu ahaan |

doonaa sidii 2024. Shaqaalaysiinta ama dalacsiinta kaliya ayaa dhalin doonta kharashaad mushaharka dheeri ah. - Miisaaniyad dheeli tiran: waxaa loo baahan yahay in dakhligu la siman yahay kharashka guud

*Tusaha 2 – Waxyaabaha ay ka kooban yihiin Ballanqaadyada Go'an (Wadarta)*

| Ballanqaadyada Go'an | Miisaaniyadda 2023-ka | Dhabta ah 2023l | *Fulinta* | Miisaaniyadda 2024-ka |
|---|---|---|---|---|
| Kharashka bankigu soo dallaco | 17,020 | 71 | 0% | 200 |
| Korontada | 87,300 | 4,355 | 5% | 80,000 |
| Baasiinka | | | | |
| Lacagaha Internet-ka | 68,200 | | 0% | 30,000 |
| Kiro Xafiis | 93,000 | | 0% | 84,000 |
| Biyo | 56,000 | | 0% | |
| Ujuurada barista/hantidhowrka | 20,000 | | 0% | |
| Ujuurada telefishanka | 60,000 | 55,000 | 92% | 60,000 |
| Dayactirka iyo hagaajinta qalbka iyo makiinadaha waaweyn | 108,000 | | 0% | |
| Dayactirka iyo hagaajinta dhismaha | 60,000 | | 0% | |
| Dayactirka alaabooyinka iyo agabka | 8,360 | | 0% | 400,000 |
| Dayactirka qalabka | | | | |
| Dayactirka alaabooyinka iyo agabka | | | | |
| Dayactirka Gawaarida | | | | |
| Naftada iyo ooliyada | 322,000 | | 0% | 500,000 |
| Dayactirka gawaarida, doomaha iyo maraakiibta | 440,000 | | 0% | |
| **Wadarta Guud** | **1,339,880** | **59,425** | | **1,154,200** |

Shaxda kore waxaa ku dhigan waxyaabaha ay ka kooban yihiin ballanqaadyada go'an ee waqtigan la joogo. Hoos waxaa ka muuqda qaar ka mid ah kuwii dhabta ahaa ee 2023 ee ka horreeyey iyo kan miisaaniyadda 2024.

*Tusaha 3 – Waxqabadka FY 2023 marka loo eego Qaybaha*

| | | | 2023 Dhab ah | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | Dowladda Maalgeliso Mushaaraad | Deeq-bixiye Maalgeliyo | Ballanqaadyada Go'an | Kale | WADARTA |
| Xafiiska Hantidhowrka Guud | - | 59,801 | | - | 59,801- |
| Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda | - | 78,564 | | - | 78,564- |
| Baarlamaanka Hirshabeelle | 916,000 | 516,000 | | - | 1,432,000- |
| Wasaaradda Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda | - | - | | - | - - |
| Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga | - | - | | - | - - |
| Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka | - | 190,164 | | - | 190,164- |
| Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha | - | - | | - | - - |
| Wasaaradda Dastuurka & Arrimaha Federaalka | - | - | | - | - - |
| Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | 200 | 1,279,352 | - | 14,000 | 1,293,552 |
| Wasaaradda Ilaalinta Bay'ada iyo Badda | - | 66,557 | - | - | 66,557 |
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 17,650 | 676,116 | 3,425 | 13,334 | 710,526 |
| Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada | - | 2,880,330 | - | - | 2,880,330 |
| Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | - | 88,760 | - | - | 88,760 |
| Wasaaradda Warfaafinta iyo Dhaqanka | 48,425 | - | 55,000 | - | 103,425 |
| Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Dowladaha Hoose | - | 464,295 | 1,000 | 1,839,099 | 2,304,394 |
| Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Garsoorka | - | - | - | - | - |
| Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha | - | - | - | - | - |
| Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa | - | 64,850 | - | - | 64,850 |
| Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta | - | - | - | - | - |
| Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Iskaashiga Caalamiga ah | - | 211,335 | - | - | 211,335 |
| Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda | - | - | - | - | - |
| Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyada Casriga ah | - | - | - | - | - |
| Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Dib-u-dhiska | - | 51,970 | - | - | 51,970 |
| Wasaaradda Dib-u-heshiisiinta iyo Dib-u-dejinta | - | 584,996 | - | - | 584,996 |
| Wasaaradda Dhaqancelinta iyo Hub-ka-dhigista | - | - | - | - | - |
| Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta | - | - | - | - | - |
| Wasaaradda Amniga iyo Dhaqancelinta | 1,116,229 | 1,784,000 | - | - | 2,900,229 |
| Wasaaradda Madaxtooyada Dowlad-goboleedka | - | 1,038,922 | - | 17,740 | 1,056,662 |
| Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka | - | - | - | - | - |
| Wasaaradda Biyaha, Tamarta iyo Macdanta | - | 452,990 | - | - | 452,990 |
| Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul-Insaanka | - | 53,104 | - | - | 53,104 |
| Wasaaradda Horumarinta Miyiga | - | - | - | | - |
| **WADARTA GUUD** | **2,098,504** | **10,542,105** | **59,425** | **1,884,173** | **14,584,208** |

*Tusaha 4 –Miisaaniyadda FY 2024 marka loo eego Qaybaha*

| | Miisaaniyadda 2024 | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | Dowladda maalgeliso Mushaaraad | Deeq-bixiye Maalgeliya | Ballanqaad Go'an (Dowladda Maalgeliso) | Kale | WADARTA |
| Xafiiska Hantidhowrka Guud | 18,000 | 72,420 | - | 1,500 | 91,920 |
| Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda | 14,400 | 78,564 | - | 1,500 | 94,464 |
| Baarlamaanka Hirshabeelle | 1,504,000 | - | 184,000 | 30,000 | 1,718,000 |
| Wasaaradda Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda | 32,220 | 25,056 | - | 2,400 | 59,676 |
| Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka | 32,220 | 976,316 | - | 2,400 | 1,010,936 |
| Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Dastuurka & Arrimaha Federaalka | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | 32,220 | 3,617,516 | - | 128,600 | 3,778,336 |
| Wasaaradda Ilaalinta Bay'ada iyo Badda | 32,220 | 411,241 | - | 2,400 | 445,861 |
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 219,840 | 784,453 | 80,200 | 40,000 | 1,124,493 |
| Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada | 32,220 | 2,519,979 | - | 2,400 | 2,554,599 |
| Wasaaradda Gargaarka Iyo Maareynta Musiibooyinka | 32,220 | 108,865 | - | 2,400 | 143,485 |
| Wasaaradda Warfaafinta iyo Dhaqanka | 94,620 | 15,420 | 60,000 | 2,400 | 172,440 |
| Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Dowladaha Hoose | 32,220 | 1,214,758 | - | 2,450,040 | 3,697,018 |
| Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Garsoorka | 56,220 | 15,420 | - | 2,400 | 74,040 |
| Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa | 32,220 | 313,909 | - | 2,400 | 348,529 |
| Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Iskaashiga Caalamiga ah | 32,220 | 449,880 | - | 2,400 | 484,500 |
| Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyada Casriga ah | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Dib-u-dhiska | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Dib-u-heshiisiinta iyo Dib-u-dejinta | 32,220 | - | - | 302,400 | 334,620 |
| Wasaaradda Dhaqancelinta iyo Hub-ka-dhigista | 32,220 | - | - | 2,400 | 34,620 |
| Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Amniga Iyo Dhaqancelinta | 1,032,220 | 15,420 | 100,000 | 102,400 | 1,250,040 |
| Wasaaradda Madaxtooyada Dowlad-goboleedka | 624,000 | 226,824 | 730,000 | 270,000 | 1,850,824 |
| Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka | 32,220 | 15,420 | - | 2,400 | 50,040 |
| Wasaaradda Biyaha, Tamarta iyo Macdanta | 32,220 | 1,879,456 | - | 2,400 | 1,914,076 |
| Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul-Insaanka | 32,220 | 92,420 | - | 2,400 | 127,040 |
| Wasaaradda Horumarinta Miyiga | 32,220 | - | - | 2,400 | 34,620 |
| **WADARTA GUUD** | **4,336,580** | **12,972,117** | **1,154,200** | **3,381,640** | **21,844,537** |

## Arrimaha Saameynaya Xaddiyada Lacagaha Ugu Badan

1) **Qorista shaqaale cusub min dhammaadka 2023 ilaa dhammaadka 2024**: kharashaadka dhabta ah ee 2023 wuxuu ka turjumayaa heerka kharash-gareynta oo ku saleysan dhammaan shaqaalaha la shaqaaleeyay sanadka gudahiisa. Miisaaniyadda 2024 waxay ka dhigan tahay shaqo-qoris qorsheysan.
2) **Heerka dakhliga suuragalka ah**, heerkan wuxuu go'aaminayaa baqshadda guud iyo inta noo dhiman si aan u qoondeyno ka-dib markaan daboolno baahiyada mushaaraadka aasaasiga ah iyo ballanqaadyada go'an.

***Si loo dhammeystiro xaddiyada lacagaha ugu badan, waxaan u baahanahay in aan oggaano:***

1) Waxa uu noqon doono heerka shaqaalaha sanadka 2025, iyo qiyaasta macquulka ah ee baahiyada mushaaraadka ee 2025 (iyadoo aan jirin shaqo-qorid dheeraad ah)
2) Waa maxay taageerada Deeq-bixiyayaasha suuragalka ah (oo uu ku jiro RCRF) iyo sidee tani loo qoondeyn doonaa?
3) Dakhliga suuragalka ah in la helo 2025
4) Arrimaha saameyn kara inta ay le'eg yihiin ballanqaadyada go'an (t.a., sicir-bararka)
5) Waa kuwee Wasaaradaha mudnaanta lagu siinayo kharash-gareynta cusub iyo shaqo-qorista cusub.

*Tusaha 5 – Saamiyada Xaddiga Lacagaha Ugu Badan iyo Mudnaanaha Siyaasadda*

| | Saamiga Kale | | Saamiga Wadarta | | | 2025 | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | 2023 Dhab ah | 2024 Miisaaniyad | 2023 Dhab ah | 2024 Miisaaniyad | Mudnaanta | La sojediyay Kale | La sojediyey Wadarta |
| Xafiiska Hantidhowrka Guud | 0.0% | 0.0% | 0.4% | 0.4% | low | 1.0% | 0.6% |
| Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah | 0.0% | 0.0% | 0.5% | 0.4% | low | 1.0% | 0.6% |
| Baarlamaanka Hirshabeelle | 0.0% | 0.9% | 9.8% | 7.9% | High | 6.4% | 6.7% |
| Wasaaradda Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.3% | low | 1.0% | 0.4% |
| Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka | 0.0% | 0.1% | 1.3% | 4.6% | medium | 6.4% | 6.1% |
| Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Dastuurka & Arrimaha Federaalka | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | 0.7% | 3.8% | 8.9% | 17.3% | medium | 12.0% | 19.4% |
| Wasaaradda Ilaalinta Bay'ada iyo Badda | 0.0% | 0.1% | 0.5% | 2.0% | medium | 2.0% | 2.4% |
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 0.7% | 1.2% | 4.9% | 5.1% | High | 6.4% | 5.7% |
| Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada | 0.0% | 0.1% | 19.7% | 11.7% | high | 12.0% | 14.5% |
| Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | 0.0% | 0.1% | 0.6% | 0.7% | low | 1.0% | 0.8% |
| Wasaaradda Warfaafinta iyo Dhaqanka | 0.0% | 0.1% | 0.7% | 0.8% | low | 1.0% | 0.8% |
| Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Dowladaha Hoose | 97.6% | 72.5% | 15.8% | 16.9% | High | 12.0% | 8.8% |
| Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Garsoorka | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.3% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa | 0.0% | 0.1% | 0.4% | 1.6% | low | 1.0% | 1.7% |
| Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Iskaashiga Caalamiga ah | 0.0% | 0.1% | 1.4% | 2.2% | medium | 2.0% | 2.6% |
| Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyada Casriga ah | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Dib-u-dhiska | 0.0% | 0.1% | 0.4% | 0.2% | medium | 2.0% | 0.7% |
| Wasaaradda Dib-u-heshiisiinta iyo Dib-u-dejinta | 0.0% | 8.9% | 4.0% | 1.5% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Dhaqancelinta iyo Hub-ka-dhigista | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | Low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Amniga iyo Dhaqancelinta | 0.0% | 3.0% | 19.9% | 5.7% | High | 6.4% | 7.3% |
| Wasaaradda Madaxtooyada Dowlad-goboleedka | 0.9% | 8.0% | 7.2% | 8.5% | High | 6.4% | 6.0% |
| Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | Low | 1.0% | 0.3% |
| Wasaaradda Biyaha, Tamarta iyo Macdanta | 0.0% | 0.1% | 3.1% | 8.8% | Low | 6.4% | 10.1% |
| Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul-Insaanka | 0.0% | 0.1% | 0.4% | 0.6% | Low | 1.0% | 0.7% |
| Wasaaradda Horumarinta Miyiga | 0.0% | 0.1% | 0.0% | 0.2% | Low | 1.0% | 0.3% |

Wasaaradaha ugu muhiimsan waxay la xiriiraan arrimaha gudaha iyo dowladaha hoose, caafimaadka iyo amniga iyo Waxbarashada oo helaya saamiga ugu badan ee miisaaniyadda, waxaanna ku xiga wasaaradaha caafimaadka, waxbarashada, madaxtooyada, biyaha, korontada iyo macdanta, iyo maaliyadda. Ogow, in mudnaanaha siyaasadda ay ka mid yihiin qaddarka loo qoondeeyay wasaaradaha iyadoo loo soo marsiinayo maalgelinta dowlad-goboleedka (FMS) ka-dib xisaabinta baahida ugu yar (mushaaraadka, kharashaadka soo noqnoqda ee aasaasiga ah).

*Tusaha 6 – Miisaaniyadda 2025 ee ugu dambeysa*

| | 2025 Est | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Government Funded Salaries - Continuing (2023 actual) | Donor Funded (2025 Actua Estimation) | Fixed Commitment Minimum (2024 budget) | Policy Priorities - Other, inc new govt funded staff (2023 and planned 2024) | TOTAL | Minimum need |
| Xafiiska Hantidhowrka Guud | - | 67,416 | - | 19,500 | 86,916 | - |
| Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda | - | 414,164 | - | 15,900 | 430,064 | - |
| Baarlamaanka Hirshabeelle | 916,000 | 217,000 | 184,000 | 618,000 | 1,935,000 | 1,100,000 |
| Wasaaradda Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda | - | 9,636 | - | 256,716 | 266,352 | - |
| Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka | - | 3,658,530 | - | 34,620 | 3,693,150 | - |
| Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Dastuurka & Arrimaha Federaalka | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | 200 | 4,325,078 | - | 80,620 | 4,405,898 | 200 |
| Wasaaradda Ilaalinta Bay'ada iyo Badda | - | 319,900 | - | 34,620 | 354,520 | - |
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 17,650 | 2,177,924 | 80,200 | 331,099 | 2,606,873 | 97,850 |
| Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada | - | 2,327,518 | - | 34,620 | 2,362,138 | - |
| Wasaaradda Gargaarka Iyo Maareynta Musiibooyinka | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Warfaafinta iyo Dhaqanka | 48,425 | - | 60,000 | 72,271 | 180,696 | 108,425 |
| Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Dowladaha Hoose | - | 6,652,891 | - | 1,181,060 | 7,833,951 | - |
| Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Garsoorka | - | - | - | 418,620 | 418,620 | - |
| Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa | - | 3,439,566 | - | 34,620 | 3,474,186 | - |
| Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Iskaashiga Caalamiga ah | - | 364,590 | - | 34,620 | 399,210 | - |
| Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyada Casriga ah | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Dib-u-dhiska | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Dib-u-heshiisiinta iyo Dib-u-dejinta | - | 612,667 | - | 669,239 | 1,281,906 | - |
| Wasaaradda Dhaqancelinta iyo Hub-ka-dhigista | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Horumarinta Miyiga | 1,116,229 | - | 100,000 | (1,181,609) | 34,620 | 1,216,229 |
| Wasaaradda Amniga Iyo Dhaqancelinta | - | 2,417,000 | 730,000 | 2,932,220 | 6,079,220 | 730,000 |
| Wasaaradda Madaxtooyada Dowlad-goboleedka | - | 946,824 | - | 1,424,000 | 2,370,824 | - |
| Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| Wasaaradda Biyaha, Tamarta iyo Macdanta | - | 1,447,769 | - | 34,620 | 1,482,389 | - |
| Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul-Insaanka | - | - | - | 34,620 | 34,620 | - |
| **TOTAL** | **2,098,504** | **29,398,473** | **1,154,200** | **7,495,416** | **40,146,593** | **3,252,704** |

**N.B.** All government funded salaries are from Fund code 11, the donor funded spending largely represent RCRF funds

Ogow: Wasaaradda Horumarinta Miyiga waxaa la dhisay 2023.

Maaliyadaha deeq-bixiyayaasha ayaa dhammaan loo qoondeeyaa Wasaaradaha iyadoo lagu saleynayo barnaamijyada deeq-bixiyayaasha. Ballanqaadyada go'an waxay ka dhigan yihiin baahida la qiyaasay ee kharashaadka muhiimka ah sida kirooyinka. Joog-u-taxa kale waxaa loo adeegsan karaa qiyaasta mudnaanaha siyaasadda, tusaale ahaan wuxuu muujinayaa qaddarka loo qoondeeyay wasaaradaha Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya (HSS) ka-dib marka la xisaabiyo kharashaadka caadiga ah. Wadarta joog-u-taxa waxay muujinaysaa xaddiga guud ee lacagaha loo qoondeey Wasaaradaha ay khuseyso oo ay ku jiraan baahida ugu yar iyo mudnaanaha siyaasadda.

Sanadkii 2024, deeq-bixiyayaasha waxay mushaar ahaan u bixiyeen lacag dhan USD 4,464,656 oo la filayo in ay sii socoto sanadka 2025.

Ballanqaadyada go'an oo ahaa USD 1,154,200 waxay u dhigmaan qiyaasta ugu yar ee loogu baahan yahay kharashaadka muhiimka ah ee la xiriira waxyaabaha sida kirooyinka, dayactirka, iwm. Sanadka 2025, miisaaniyadda ballanqaadka go'an ee 2024 ayaa loo adeegsadaa baahiyaha ugu yar ee sii soconaya. Joog-u-taxa Baahiyaha Ugu Yar wuxuu muujinayaa tirada loo baahan yahay ee daboolaysa baahiyahan ugu yar: mushaaraadka dowladda iyo ballanqaadka go'an oo ah 3,252,704. Saadaasha wadarta guud ee dakhliga gaarka ah ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee 2025 **waa USD 8,026,024.12.** Qaddarada taageerada ka imaanaysa Deeq-bixiyayaasha iyo DFS waa la sugayaa USD 32,120,569

*shaxda 9aad – saadaasha qarashka ee sanadka 2025*

| | |
|---|---|
| Wadarta guud ee dakhliga gudaha | **USD 8,026,025** |
| Wadarta guud ee deeqaha DFS | USD 2,722,096 |
| Wadarta guud ee maaliyadaha deeq-bixiyayaasha | USD 29,398,473 |
| **WADARTA GUUD EE DAKHLIGA** | **USD 40,146,593** |
| **Kharashaadka La Qoondeeyay** | **USD 40,146,593** |
| Baahiyaha ugu yar | USD 3,252,704 |
| Mudnaanaha siyaasadda | USD 4,773,320 |
| Maaliyadaha deeq-bixiyayaasha | USD 29,398,473 |
| Deeqaha DFS | USD 2,722,096 |
| **Wadarta guud ee miisaaniyadda 2025** | USD 40,146,593 |

# 3 KHATARAHA KU SOO WAJAHAN MIISAANIYADDA

## 3.1 ARRIMAHA UBAAHAN IN ISHA LAGU HAAYO SI HOREY LOOGU SOCDO

### 3.1.1 Maamulka Maaliyadda Guud

Hawlgallada iyo joogteynta maaliyadaha dowladda waxay ku tiirsan yihiin PFM wanaagsan; sidaa daraaddeed, waxaa muhiim noqon doonta in dhammaan hay'adaha Dowladda iyo shaqaalahaba ay u hoggaansamaan mabaadii'da iyo habraacyada ku xusan Xeerka PFM. Dhammaan Wasaaradaha, Waaxaha iyo Hay'adaha (MDSs) Dowladda waa in ay:

1. Xaqiijiyaan in dhammaan dakhliga dowladda lagu shubo Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda;
2. Xaqiijiyaan in Wasaaradda Maaliyadda (MoF) si degdeg ah loogu wargeliyo dhammaan ballanqaadyada deeq-bixiyaha cusub; iyo
3. Xaqiijiyaan dhammaan wax-soo-iibsiga (alaabooyinka, adeegyada la-talinta, adeegyada aan la-talinta ahayn iyo shaqooyinka) in loo maro Waaxda Wax-soo-iibsiga Wasaaradda Maaliyadda.

Saddexdan habraac waxay muhiim u yihiin xaqiijinta in maaliyadaha si sax ah loogu xisaabtamo oo loo sheego.

### 3.1.2 Ka-qaybgalka Bulshada ee Miisaaniyadda

Maamulka gacanta ku haya maaliyadaha dadweynaha ahaan, Dowladda waxaa waajib uu ka saaran yahay in ay muwaadiniinteeda u soo bandhigto in dakhliyada loo qoondeeyay si wax-ku-ool ah loo dhaqangeliyo si loo gaaro ujeeddooyinka horumarinta bulsho-dhaqaale ee muwaadinka. Iyadoo ujeeddadan maanka lagu hayo, ayay Wasaaradda Maaliyadda waxay mareegtadeeda ama barteeda internetka ku daabaceysaa Miisaaniyad Sanadeeda iyo warbixinnada maaliyadda ee saddexdii biloodba mar soo baxda si ay macluumaadkan uga dhigto mid ay heli karaan dadweynaha oo ay ka mid yihiin deeq-bixiyayaasha caalamiga ah, muwaadiniinta Soomaaliyeed, iyo bulshada oo dhan.

### 3.1.3 Halisaha Dhaqaalaha

Ka weecashada arrimaha jiritaankooda lagu xisaabtamey ee la xiriira dhaqaalaha guud ee taageeraya waraaqdan BFP waxay halis weyn u keeni doonaan ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadda. Guud ahaan, saadaasha koboca muddada-dhexe ee Soomaaliya waxay in badan ku xiran tahay maqnaanshaha abaaro ama daadad, waxqabadka dhaqaale ee dalalka deeq-bixiyayaasheenna, iyo saameynta dhiirrigelineed ee mashaariicda horumarinta cusub ee ay sameysay Dowladda iyo in la sameeyay iyadoo wakiil laga yahay. Sugnaan la'aanta sii socota waxay yareynaysaa awoodda ay Dowladda u leedahay in ay fuliso qorshayaasheeda. Dowladdu waxay dib-u-habeynaysaa PFM, dib-u-habeynta Xeerarka PFM iyo Dakhliga, iyo kastamka ayaa la filayaa in ay gacan ka geystaan xaqiijinta in kheyraadyada la heli karo iyo si wax-ku-ool ah loogu adeegsado ujeeddooyin la ballanqaadey. In xoogga la saaro wax-soo-iibsiyada dowladda oo si fiican loo maareeyay waa in ay xaqiijisaa fulinta hufan ee ujeeddooyinka siyaasadda.

### 3.1.4 khataraha Ha'yadha

Tan iyo markii la aasaasey, waxqabadka dowladda ee khuseeya hirgelinta tallaabooyinka canshuurta ayaa ahaa mid isku-dhaf ah. Gaarista xaddidan ee canshuur-bixiyayaasha, la'aanta macluumaadka canshuur-bixiyaha, baro kantarool oo sharci-darro ah oo meel-walba yaala, fahamka liita ee dhinaca canshuur-bixiyayaasha oo ku saabsan muhiimadda ay leedahay in canshuuraha lagu bixiyo waqtigii loo baahnaa, ka weecinta lacagaha dowladda Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda, iyo wax-soo-iibsiyada oo loo sameeyo si ka baxsan qaabka guud ee sharciga Xeerka PFM ayaa dhamaman halis weyn ku ah joonteynta maaliyadda hay'adaha dowladda. Si halisahan loo maareeyo,

Dowladda waxay aad xoogga u saareysaa xirfadlenimada hawlaheeda dakhli ururinta, oo ay taageerayaan Xeerka Dakhliga iyo xeernidaamyada iyo tilmaamaha hoos yimaada.

### 3.1.5 Khatarta Shaqaalaha Dowladda

Marka la eego dhanka caqabadaha kheyraadka ee haysta, Dowladda waxay la dhibtooneysaa soo-jiidashada xirfadlayaal aqoon leh in ay ku soo biiraan shaqaalaha rayidka ah. Marka awoodda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ay kororto, Wasaaradaha waxay si dhow ugala shaqeyn doonaan Guddiga in uu diyaariyo qorsheyaasha shaqaalaha ee muddada-dhexe, si ay u taageeraan hanaanka miisaaniyad diyaarinta iyagoo bixinaya tilmaan iyo sabab waadax ah oo loogu talagalay heerarka shaqaalaha ee la soo-jeediyay.

Halisahan hoose ayaa gaar ku ah Hirshabeelle waxayna go'aaminayaan arrimaha saameyn ku yeelan kara dhaqaalaha guud iyo xaaladaha maaliyadeedba.

*Tusaha 7 - **Tusaha Halista Maaliyadda Guud (Macro-Fiscal Risk)***

| Halista | Suuragalnimadeeda | Raadkeeda |
|---|---|---|
| Kororka kharashaadka badeecadaha ugu muhiimsan ee qoysasku isticmaalaan oo dhibaato ku noqda wanaagga dadka | **Dhexdhexaad** - qiimaha badeecadaha ayaa kordhayey tan iyo markii uu bilowdey dagaalka Ruushka-Ukraine, laakiin sicir-bararka ayaa hoos u dhacey waxaana sabab u ah dalagyo wanaagsan oo soo go'ay. | **Dhexdhexaad –** kororka kharashka ayaa ahaa mid ballaaran laakiin waxaa ay hadda u badan tahay in uu cabbir ahaan xaddidan yahay |
| Farqiqa ballaaran ee dakhliga deeqaha ah oo adkeeya fulinta miisaaniyadda | **Sarreysa –** dakhliga deeqaha ah ayaa taariikhiyan ay saadaalintiisu ahayd mid adag | **Sarreysa –** waxaa uu weli yahay qayb mug leh oo ka mid ah miisaaniyadda |
| Abaaraha oo sababa hoos-u-dhac dhaqaale | **Hooseysa –** caddeyn xaddidan ayaa loo hayaa in xaaladuhu ay sii xumaadeen | **Sarreysa –** dhaqaalaha ayaa aad ugu xiran waaxda beeraha |
| Fatahaadaha | **Sarreysa –** Fatahaadaha webiga shabeelle ayaa ah kuwo badan | **Dhexdhexaad –** waxaa ay raad ku leeyihiin waaxda beeraha |
| Ka-qaybgalka cuddada shaqaalaha oo hooseysa | **Sarreysa -** 30% ee cuddada shaqaalaha waa shaqo la'aan | **Sarreysa -** ma jiraan shaqaale kor-u-qaadaya dhaqaalaha. |
| Lacagihii xawaaladaha la isugu soo diri jirey oo yar | **Dhexdhexaad –** lacagaha xawaaladaha la isugu soo diro oo ah isla heerkii sanadkii hore | **Dhexdhexaad-** lacagaha xawilaadda ah ayaa qayb muhiim ah ka ah dakhliga iyo sarifka lacagaha qalaad |
| Barakaca gudaha dalka oo kordha | **Sarreysa –** barakaca ayaa si joogto ah u dhaca | **Sarreysa –** waxaa uu kordhin karaa kharashaadka waxaana uu sababi karaa khalkhal ku yimaada dhaqaalaha |

**da (Tayada degaanka): Qiimayaasha magac-u-yaalka ah ee tafaariiqda ee Baladweyne**